



Heshiiska Madashada Wasiirada Maaliyada ee Maaraynta Dakhliga

Taariikhda: December 19th, 2017

Goobta: Guriga Martida, Kismaayo Jubbaland

A. Horudhac

Shirka madasha Wasiirada Maaliyadda oo ay qaban-qaabisay Wasaaradda Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ayaa lagu qabtay magaalada Kismaayo, Jubbaland 17kii ilaa iyo 20kii Bisha December, 2017, si ay wada hadalo uga yeeshaan xoojinta xiriirka Dowladda Dhexe iyo Dowladaha Xubnaha ka ah dowladda Federaalka dalka; isla markaasna u ansixiyaan talooyin ay soo gudbiyeen Guddiga farsamo ee xiriirka Dowladaha oo ka kooban 14 xubnood.

Shirkaan waxaa shir guddoominaayay Wasiirka Maaliyadda DFS Mudane, **Cabduraxmaan Ducaale Bayle** iyadoo ay ka soo qayb-galeen xubnaha ay ka mid yihiin Wasiirka ku xigeenka Wasaaradda Maaliyadda, Wasiirka Maaliyadda Puntland, Wasiirka Maaliyadda Jubbaland, Wasiirka Maaliyadda Koonfur Galbeed, Wasiirka Maaliyadda Hirshable iyo Wasiiru Dowlaha Maaliyadda Galmudug.

Shirkaan wuxuu daba socday shir lagu qabtay Magaalada Garowe September 2017, oo ay madashu ku balantay in December lagu kulmo Magaalada Kismaayo loogana doodo afar arrimood oo ay madasha wasiirada ku amreen guddiga farsamada in ay ka wada xaajoodaan dabadeedna talooyin u soo gudbiyaan Wasiirada Maaliyadda.

Afarta Ajende waxaa ay kala yihiin sida tan:

1. Ka doodista habka loo midayn karo canshuurta gadista;
2. Dib-u-eegsita heshiiska SOMA (SOMA agreement);
3. Qaabka meelaynta dakhli qabashada (Revenue Assignment)
4. Samaynta qorshe-hawleedka guddiga

1. Canshuurta Gadista

Guddigu dood iyo falanqayn dheer ka dib waxay ku heshiyeen in marka hore sharciga canshuurta gadista dib-u-habayn lagu sameeyo markaa ka dibna la mideeyo canshuurta gadista ee dalka oo dhan. Waxay isla garteen in aan la midayn Karin canshuurta gadsista iyada oo aan la helin buddhigga sharciga oo aan dib-u-eegis balaarin lagu samayn.

A. Jari AB

M.A. A

Sidaas darteed waxay soo jeediyeen arrimahaan hoos ku xusan:

- a) Dib-u-habayn (Ku daris, dhimis iyo turxaan bixin) sharciga canshuurta gadista
- b) Xirfad sare u qaadid hawl-wadeennada ku hawlan canshuurta gadista;
- c) Wacyi galin ballaaran oo midaysan, kuna aadan canshuurta gadista oo dalka oo dhan laga fuliyo
 - a. Guddiga haka talo bixiyo nidaamka loo marayo wacyi-galin oo midaysan

2. Heshiiska SOMA

Guddigu wuxuu dood dheer ka yeeshay saamaynta iyo sharci ahaanshiyaha Heshiiska SOMA, dood dheer ka dib waxaa u soo baxay in heshiiskani caqabad wayn ku yeeshay hanaanka dhakhli uruurinta doawladda uuna lumiyo malaayiin doolar oo dakhliga gudaha ah isagoo si aan sharci ahayn difaac u siinaya qandaraasleyaasha ganacsi ee heshiis la gala UN-ta.

Sidaas darteed Guddigu wuxuu cuskanayaa qodobadan soo socda inaanu sharci ahayn heshiiskan:

- a) Waxuu si buuxda uga gudbay xadka DIFAACA iyo CAFISKA loo asteeyay UN-ta ee ku cad heshiiska GENEVA ee loo yaqaano "Geneva Convention, 1961";
- b) Waxa uu jabinayaa shuruucda dalka ee canshuur dhaafka ku salaysan taasi oo ka dhigaysa sharci darro;
- c) Wuxuu ka hor imaanayaa shuruucda dalka ee cadaynaya in heshiisyadu ka hor imaan Karin dastuurka dalka;
- d) Lama marin hab-raaca ansixinta sharciyada dalka, (hindise ilaa ansixin Baarlamaan);
- e) Waa heshiis ku dhisan xaglin hal dhinac;
- f) Qiyaastii sanadkii 22 million oo dakhli ah baa ku baaqata heshiiskaan dartiis;
- g) Xafiisyada Xeer Ilaalinta Guud iyo Garyaqaanka Dowladda waxay soo jeediyeen dhaliil badan oo heshiiskaan xambaarsan

Sidaas darteed guddigu wuxuu soo jeedinayaa in heshiiska SOMA dib-u-eegis lagu sameeyo laguna saleeyo heshiiska Geneva iyo sharciga dalka uyaala lana marsiyo Goloyaasha sharci dajinta dalka

A

Furu

AB

M.A

A

F. Q. Q.

3. Qaabka meelaynta dakhli qabashada (Revenue assignment)

Guddigu wuxuu sidoo kale dood dheer ka yeeshay habka ugu haboon ee loo wajihi karo meelaynta dakhli qabashada dalka. Lafagurid dheer ka dib guddiga waxaa u cadaaday in agandahaan aan aqoon dheeraad loo lahayn, go'aanna aan laga gaari Karin hadda sidaas darteed waxay soo jeediyeen laba arimood:

AD *Qiri*

ARB

M.A *A*

- a) In marka hore agoon kororsi loo sameeyo xubnaha guddiga oo arintaan ku aadan, ayna boooqdaan waddamo soo maray marxaladda mid la mid ah tan Soomalia.
- b) In la mideeyo shuruuca canshuuraha barriga – Midaynta canshuuraha barriga guddiga waxaa ay u sahlayaa in si fudud la isug raaco habka meelaynta dakhli qabashada dalka.

Liiska Shuruuca canshuuraha barriga ee u baahan in la mideeyo waa sida hoos ku xusan oo muujinaya sida ay maamulladu u isticmaalaan hadda:

NO	Maamulka	Canshuurta		
		Toosn (Direct)	Dabban (Indirect)	Lacago
1.	Federaalka	<ol style="list-style-type: none"> 1. Canshuurta Macaashka Shaqaalaha 2. Canshuurta Macaashka Daaraha 3. Macaashka Ganacsiga 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Gadidda 2. Socodka Baabuurta 3. Wax soo saarka 4. Diwaan galinta 5. Mooraka 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Baasaboorka 2. Visaha 3. Dhamaan rugsadaha iyo adeegyada hay'daha dowliga ah bixiyaan
2.	Puntland	<ol style="list-style-type: none"> 1. Canshuurta Macaashka Shaqaalaha 2. Canshuurta Macaashka Daaraha 3. Macaashka Ganacsiga 4. Macaashka xirfadlayaasha 5. Kirada Gawaarida 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Gadidda 2. Socodka Baabuurta 3. Wax soo saarka 4. Diwaan galinta 5. Mooraka 6. Canshuurta waddo marista 7. Ujuurada maxkadamaha 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Baasaboorka 2. Visaha 3. Dhamaan rugsadaha iyo adeegyada hay'daha dowliga ah bixiyaan
3.	Jubbaland	<ol style="list-style-type: none"> 1. Canshuurta Macaashka Shaqaalaha 2. Macaashka Ganacsiga 3. Kirada Gawaarida 4. Kirada Guryaha 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Gadidda 2. Socodka Baabuurta 3. Wax soo saarka 4. Diwaan galinta 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Baasaboorka 2. Visaha (Cidda gaada waa Federaalka) 3. Dhamaan rugsadaha iyo adeegyada hay'daha dowliga ah bixiyaan

Sheer

			<ol style="list-style-type: none"> 5. Canshuurta waddo marista 6. Ujuurada maxkadamaha 	
4.	K/Galbeed	<ol style="list-style-type: none"> 1. Canshuurta Macaashka Shaqaalaha 2. Macaashka Ganacsiga 3. Kirada Guryaha 4. Kirada Gawaarida 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Gadidda 2. Socodka Baabuurta 3. Diwaan galinta 4. Canshuurta waddo marista 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Baasaboorka 2. Visaha (Cidda qaadda waa Federaalka) 3. Dhamaan rugsadaha iyo adeegyada hay'daha dowliga ah bixiyaan
5.	Galmudug	<ol style="list-style-type: none"> 1. Shaqaalaha 2. Macaashka Ganacsiga 3. Kirada Guryaha 4. Kirada Gawaarida 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Gadidda 2. Socodka Baabuurta 3. Diwaan galinta 4. Canshuurta waddo marista 5. Canshuurta saddax-biloodle 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Baasaboorka 2. Visaha (Cidda qaadda waa Federaalka) 3. Dhamaan rugsadaha iyo adeegyada hay'daha dowliga ah bixiyaan
6.	Hirshabele	<ol style="list-style-type: none"> 1. Shaqaalaha 2. Macaashka Ganacsiga 3. Kirada Guryaha 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Gadidda 2. Socodka Baabuurta 3. Diwaan galinta 4. Canshuurta saddax-biloodle 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Baasaboorka 2. Visaha (Cidda qaadda waa Federaalka) 3. Dhamaan rugsadaha iyo adeegyada hay'daha dowliga ah bixiyaan

Am

M.A

Soo koobid: Go'aannada ka soo baxay madasha shirka Kismaayo ee u baahan in la dhaqan-galiyo waa sida shaxda hoose ku xusan


GO'AANNADA SHIRKA MADASHA WASIIRADA EE KISMAAYO		
1.	CANSHUURTA GADISTA	Sharciga canshuurta gadista in dib-u-eegis balaaran lagu sameeyo laguna saleeyo baahida maanta jirta, lana fuliyo labada qodo ee kale ee ku xusan bogga 1aad – 2aad ee heshiiskaan
2.	HESHIISKA SOMA	Heshiiska SOMA waa in dib-u-eegis lagu sameeyo laguna saleeyo heshiiska Geneva iyo sharciga dalka uyaala lana marsiyo Goloyaasha sharci dajinta dalka
3.	QAABKA MEELAYNTA DAKHLI QABASHADA (REVENUE ASSIGNMENT)	In marka hore aqoon kororsi loo sameeyo xubnaha guddiga oo arintaan ku aadan, ayna booqdaan waddamo soo maray marxaladda la mid ah tan Soomaalia,
		In la dhaqan-galiyo midaynta liiska canshuuraha barriga ee ku xusan bogga 3aad – 4aad ee heshiiskaan
4.	Canshuurta qiimaynta (Ad valorem)	In guddiga ay ka wada hadlaan sidii la isula qaadan lahaa ku canshuuridda qiimaha badeecadaha, talooyina ay u soo jeediyaan Madasha Wasiirada si ay ansixiyaan
5.	Wadaagga Kheeraadka Dalka (Kalluunka)	In la qabto bisha Janaayo 2018 shirwayne ay u dhanyihiin madasha Wasiirada Maaliyadda iyo Wasiirada Kalluumaysiga oo looga arinsanaayo qaybsiga khayraadka badda (Kalluunka)


Hadaba, madasha Wasiirada Maaliyadda waxay qalinka ku duugtay hergalinta qodobada kor ku xusan:

Heshiiskaan wuxuu dhaqan-galayaa marka ay madasha Wasiirada Maaliyadda saxiixdo

Liiska xubnaha Wasiirada waa sida hoos ku qoran:

1. Wasiirka Maaliyadda Puntaland
Mudane Abdullaahi Siciid Carshe
2. Wasiirka Maaliyadda Jubbaland
Mudane Abdirashid Jire Khalinle





AB

3. Wasiirka Maaliyadda K. Galbeed
Mudane Abdirahman Ibraahim Aadan



4. Wasiir dowlaha Maaliyadd Galmudug
Mudane Khadar Axmed Shire



5. Wasiirka Maaliyadd Hirshabeele
Mudane Maxamed Maxamuud Cabdulle



Wasiirka Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya
Mudane, Cabdiraxmaan Ducaale Beyle

